IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 10aad Muqdisho, 10 Agoosto 1982 L. 1R8

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiln lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L.47 ee 24 Luulyo 1982, Aqoosiga iyo joogteynta Kulanka BANDHIGGA AFRIKA EE FILIMADA IYO (Mogpafis). Bogga 653

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Buug Keyd L. 8657 ku qoran Maxamed Ismaaciil Yuusuf L. 311 » 661

Wakaaladda M. Qaranka

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Jeeg L. 138007 ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud L. 312 » 662

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Jeeg L. 138011 ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud L. 313 » 663

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 138010 ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud L. 314 » 664

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 4.8.82, Lumid Jeeg L. 353244 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 315 » 665

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353243 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 316 » 666

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353248 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 317 » 667

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353246 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 318 » 668

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 7.8.82, Lumid Jeeg L. 353247 ku qoran Saciid Maxamed Madar L. 319 » 669

QAYBTA LABAAD

XEER

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS, lambar 47 taariikh 18 Luulyo 1982, Aqoonsiga iyo joogteynta kulanka BANDHIGGA AFRIKA EE FILIMADA IYO SIMI NAARKA (Mogpafis).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Baaqii Shirkii ugu horreeyey ee Muqdisho lagu qabtay 12—20 Oktoobar 1981, kuna saabsanaa Bandhigga Afrika ee Filimada iyo Simi naarka (MOGPAFIS) oo si xoog leh ugu booriyey Dowladda Soomaaliyeed, Ururka Midowga Afrika Ururka Jaamacadda Dawladaha Carbeed iyo Laanta Qaramada Midoobay ee Aqoonta iyo Dha qanka (UNESCO) inay Mogpafis u aqoonsadaan kulan dhaqmeed caalami ah oo ahmiyad weyn leh, una qalma in la siiyo taageero buuxda oo maaddi iyo macnaawiba leh oo dammaanad u noqota jiri taanka iyo joogteynta Mogpafis.

MARKUU TIXGELIYEY: In MOGPAFIS NOQOTAY MUNAASIBADDII UGU HORREYSAY ee kulmi say filim sameyayaasha Afrika iyo Carabta oo ka kala yimid dalalka ku hadla afafka Carabiga. Fa ransiiska iyo Ingiriiska, kuwaasoo doonay inay ku soo fidiyaan Bartamaha iyo Bariga Afrika, waayo aragnimadii laga dhaxlay bandhigyada filimada ee lagu qabto Carthage (TUNIS) iyo Ogadugugu (Foltada Sare).

MARKUU TIXGELIYEY: Himilooyinka MOGPAFIS oo ay ka mid yihiin: xoojinta dhaqanka waddani ga iyo horumarinta isbeddelka bulshada, iskaashi ga carabta iyo Afrika si loo gaaro hab caalami ah oo cusub ee dhaqan dhaqaale, horumarinta is—ba heysiga filimada Afrika iyo xoojinta Hay'adaha Soomaaliyeed ee u xilsaaran shinematografiyada Dalka, ayadoo arrimaha kor ku xusan dhammaan ay waafaqsan yihiin ujeeddooyinkii hadda ka hor ay guddoonsatay Dawladda Kacaanka ee Soomaa liyeed.

ISAGOO GAROWSADAY: Baahida loo qabo in ras mi ahaan loo aqoonsado MOGPAFIS inuu noqdo kulan joogto ah oo caalami ah.

ISAGOO TIXGELINAYA: Talo—bixinta Wasiirka Wa saaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweyna ha.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda

Qod 1aad

Bandhigga Afrika ee Filimada iyo Siminaarka (oo hadda ka dib loogu yeeri doono MOGPAFIS) waxaa loo aqoonsaday kulan—dhaqmeed si joogta ah loo qabto.

Qod. 2aad

1. Ujeeddada MOGPAFIS waa:
   a) Horumarinta isdhaafsiga fikradaha iyo waa ya—aragnimada filin-sameyayaasha Afrika iyo Carabta.
   b) Dhiirrigelinta wax wada qabsiga Afrika iyo Carabta ee dhinaca shinematografiyada si xal loogu helo dhibaatooyinka la xiriira keenista, qaybinta, soo saaridda canshuuridda filima da, tababaridda filin—sameyayaasha iyo daabi cidda xayeysiinta filimada.
   t) Dhiirrigelinta barashada iyo dhaafsiga dha qanka bulshada Soomaaliyeed iyo dhaqamada Afrika iyo Carabta kale.
   j) Horumarinta shinematograafiyada Soomaali yeed iyo wixii la xiriira.

2. Si loo hirgeliyo himilooyinka MOGPAFIS, wa xaa la qaadi karaa tallaabooyinka hoos ku taxan:
   a) In la abaabulo bandhig iyo ama siminaar fili meed oo caalami ah labadii sanaba mar.

b) In uu gacan ka geysto abaabulidda, ama isagu qabto bandhigyo filin, shirar iyo ama simi ryo heer kastaba ah (waddani, laba (dal ama caalami).

t) In uu abuuro qayb keydis, faafisana warar ka iyo qoraallada la xiriira shinematograafiya da Dalka.

j) In MOGPAFIS iyo Wakaaladda Filimada Soo maaliyeed (W.F.S.) yeeshaan iskaashi joogto ah dhinaca horumarinta shinematograafiyada Soomaaliyeed, gaar ahaanna xagga mashaa riicda iyo tababarrada.

x) Inuu qaado wixii tallaabooyin kale ah ee lagu hirgelinayo himilooyinka MOGPAFIS.

Qod. 3aad

Qaabka MOGPAFIS wuxuu ka koobnaan doonaa:
a) Golaha Hoggaaminta.
b) Guddiga Fulinta iyo
t) Guddiga Taageerada Caalamiga ah.

Qod. 4aad

1. Golaha Hoggaamintu wuxuu ka koobnaan doonaa:

| | |
|---|---|
| ) Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda | Guddoomiye |
| b) Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare | G/kuxigeen. |
| t) Agaasimaha Guud ee Arrimaha Dibedda | Xubin |
| j) Madaxa Hoggaanka MOGPAFIS khuseeya ee Xisbiga Hantiwadaagga K. Soomaaliyeed | Xubin. |
| x) Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed | Xoghaye. |
| kh) Laba xubnood oo kale oo uu Guddoomiyuhu magacaabo, isa | |

goo ku tixgelinaya iskutaxlujin tooda, aqoontooda iyo waayaarag nimada ay u leeyihiin MOGPAFIS Xubno

2. Golaha Hoggaamintu wuxuu kulmi doonaa laba goor sannadkiiba. Haddii ay Guddoomiyaha la haboo naato ama ay ka codsadaan ugu yaraan laba Xubnood oo kale, wuxuu qaban karaa shirar aan caadi ahayn.

3. Guddoomiyaha iyo Saddex Xubnood oo kale ayaa shiri kara, go'aannada Goluhuna waxay ku ansi xi karaan afar cod, haddii codbixinta Xubnaha shira yaa is—le'ekaato, waxaa go'aanku noqonayaa hadba dhinaca codka Guddoomiyuhu jiro.

4. Guddoomiyuhu wuxuu Xubnaha Golaha u yaq binayaa qodobada shirka lagaga hadli doono ugu ya raan lix beri ka hor, haddii uu u oggolaado Guddoomi yuhu, Xubnaha kale waxay wax ku kordhin karaan qo dobada shirku ka hadli doono; Xoghayaha ayaa mas'uul ka ah qorista iyo keydinta qoraallada shirarka Golaha Hoggaaminta.

Qod. 5aad

Xilka Golaha Hoggaaminta wuxuu ka koobnaan doonaa:

a) Inuu tixgeliyo ansixinta barnaamijka iyo go' aamada Guddiga Fulinta ee MOGPAFIS;

b) Inuu Guddiga Fulinta ee MOGPAFIS ku taa geero fulinta hawlihiisa, hirgelinta ujeeddoo yinka MOGPAFIS, iyo inuu xaqiijiyo iskaashi ga looga baahan yahay in MOGPAFIS la yee sho Wasaaradaha, Wakaaladaha, Shirikadaha, iyo Hay'adaha Dalka iyo Ururada Caalamiga ah;

t) Inuu tixgeliyo arrintii kale ee Guddoomiyaha ugu muuqata inay wax ku ool u tahay himiloo yinka MOGPAFIS.

Qod. 6aad

1. Guddiga Fulinta ee MOGPAFIS wuxuu ka koo bnaan doonaa: .....

a) Maareeyaha Guud ee Wakaalad da Filimada Soomaaliyeed Guddoomiye.

b) Guddoomiyaha Guddiga Wad daniga ah ee UNESCO Xubin;

t) Guddoomiyaha akadeemiyada Cil mi baarista, hiddaha iyo Dha qanka Xubin;

j) Agaasimaha Telefishinka ee Wa saaradda War/finta iyo H.D. Xubin;

x) Maareeyaha Waaxda wax soo saarka iyo farsamada ee Wa kaaladda Fili. Soomaaliyeed Xubin

kh) Maareeyaha Waaxda Ganacsiga ee Wak. Fili. Soomaaliyeed Xubin

d) Maareeyaha Waaxda Maamulka ee W. Fili. Soomaaliyeed Xog/Maaliyada

r) Maareeyaha Waaxda wax soo saarka ee Golaha Murtida iyo Madadaalada Xubin;

s) Saddex Xubnood oo Guddoomiya ha Golaha Hoggaamintu uu maga caabo, isagoo ku tixgelinaya isku taxalujintooda, aqoontooda iyo waaya aragnimo ay u leeyihiin MOGPAFIS Xubin;

2. Xoghayaha Guud ee Guddiga Fulinta waxaa Xub naha Guddiga Fulinta ka dhex magacaabiya Guddoo miyaha Golaha Hoggaaminta.

3. Guddiga Fulintu wuxuu shirarkiisa ka soo qayb gelin karaa ilaa afar Xubnood oo kale oo aan cod la hayn haddii la bido xog ogaalnimo, aqoonyahanimo ama waaya aragnimo.

4. Guddiga Fulintu wuxuu kulmi karaa ugu yaraan mar saddexdii biloodba; Guddigu wuxuu yeelan karaa shirar aan caadi ahayn, haddii ay Guddoomiyaha la

habboonaato ama ugu yaraan afar Xubnood oo kale ka codsadaan. Xoghayaha Guud ayaa mas'uul ka ah diiwaan gelinta doodaha iyo diyaarinta go'aannada shirarka Guddiga Fulinta ee xilka fulintoodu saaran tahay Guddoomiyaha.

5. Guddoomiyuhu wuxuu Xubnaha Guddiga Fulin ta u qaybinayaa qodobada shirka lagaga hadli doono saddex beri ka hor.

Go'aan gaarista shirku waa hal dheeri, haddii codadku barbarro noqdaanna waxaa go'aanku noqona yaa hadba dhinaca Shir Guddoomiyuhu raacsan yahay. Wuxuu shirku ku ansaxayaa Guddoomiyaha iyo 5 Xub nood.

Qod. 7aad

Xilka Guddiga Fulinta wuxuu ka koobnaan doonaa:

1. Diyaarinta barnaamijka guud ee MOGPAFIS oo la hordhigayo Golaha Hoggaaminta;

2. Qorsheynta iyo qaybinta dhammaan martiqaad yada MOGPAFIS;

3. Xulashada Dalkii ama qofkii (amaba nooca fili mada) MOGPAFIS go'aansado in maamuusid iyo miligo gaar ahaaneed loo fidiyo;

4. Raadinta (gudo iyo dibaddaba) miisaaniyadda lagu wadayo hawlaha MOGPAFIS;

5. Dib u milicsiga iyo lafa guridda barnaamijka hawlaha MOGPAFIS;

6. Tixgelinta talo bixin ka iman karta gudaha ama dibadda oo lagu codsanayo in wax laga beddelo bar naamijka u degsan MOGPAFIS;

7. Tixgelinta arrintii kale oo Guddoomiyaha ugu muuqata inay wax ku ool u tahay himilooyinka MOG PAFIS;

Guddiga Taageeridda Caalamiga ah oo shaqadiisu ay noqon doonto talo siinta Guddiga Fulinta wuxuu ka koobnaan doonaa:

1. Guddoomiyaha Guddiga Fulinta Guddoomiye;
2. Xog. Guud ee Guddiga Fulinta Xoghaye Guud
3. Guddoomiyaha FEPACI Gud/k xigeen;
4. Guddoomiyaha Bandhigga Filimada ee Carthage Xubin;
5. Xoghayaha Guud ee FESPACO Xubin;
6. Xoghayaha Guud ee Fepaci Xubin;
7. Sagaal xubnood oo kale oo ay soo magacaagiin Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Guddiga Filimada iyagoo la tashanaaya Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta, kuna xulaaya Xubnaha aqoontooda, dadaalkooda iyo taageerada ay muu jiyaan Xubin;

Qod. 9aad

MOGPAFIS hantidiisu waxa ay ka kooban tahay sida soo socota:

a) Lacag Dawladdu ay miisaaniyaddeeda ugu darto ama deeq loo sgyo;

b) Kaalmo caalami ah oo si toos ah loogu soo gud biyo MOGPAFIS;

t) Dakhliga kale oo ka yimaada barnaamijyada MOGPAFIS iyo howlaheeda kale duwan.

Dakhliga MOGPAFIS waa in xisaab gaar ah looga furaa Bankiga Soomaaliyeed, loona maamulaa habka waafaqsan nidaam xisaabeedka u degsan.

Qod. 10aad

MOGPAFIS waa in uu u madaxbannaanaadaa qorshihiisa iyo socodsiinta hawlaha la xiriira barnaa mijyadiisa, waana in uu awoodu leeyahay hanashada

amuur kasta oo lagama maarmaan ah, taas oo waafaq san Xeerkan.

Qod. 11aad

MOGPAFIS waa in ay ku xidhan tahay W. F. Si toos ahna ay u hoos timaadaa Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Hanuuninta Ummadda oo awood u leh in uu ka soo saaro Xeer nidaamiye tifaftiran gaar ahaan arrimaha Maamulka iyo lacagta si loo dhaqan geliyo Xeerkan.

Qod. 12aad

Xeerkani waxaa uu ka mid noqonayaa xeerarka dalka, waxuuna dhaqan gelayaa maalinta Madaxwey naha J.D.S. uu saxeexo.

Muqdisho, 24 Luulyo 1982

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambar. ahaa 8657 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 6.368/= uu iska lahaa Maxamed Ismaaciil Y. sida ku cad warqadda lam.————— taariikh 4.8.82 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Buugga Keydka lam. 8657, oo ku qoran magaca Maxamed Ismaaciil Yuusuf ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 6.368.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dhexe u beddelo Maxamed Ismaaciil Yuusuf buugga keydka ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah kad dib markay ka soo wareegto muddo, aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax...

L. 311.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 138007, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dh/Mareeb kuna qoran lacag dhan Sh. So. 42.000/= uu iska lahaa Maryan Sheekh Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 006549, taariikhdeedu 3.8.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeyq.XisaabiyahaGuud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (mortamento) Jeegga lam. 138007 oo ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 42.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dh/Mareeb u beddelo Maryan Sheekh Maxamuud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax...

L. 312

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 138011 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50:000/= uu iska lahaa Maryan Sheekh Maxamuud sida ku cad warqadda lam: 006549 taariikhdeedu 3.3.1982 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xisaabaha Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam: 138011 oo ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud ayna ku jirto Sh: So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dh/Mareeb u beddelo Maryan Sheekh Maxamuud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mudo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L: 313

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku·qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 138010, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dh/Mareeb kuna qoran lacag dhan Sh. So. 36.500/= uu iska lahaa Maryan Sheekh Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 006549 taariikhdeedu 3:8.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta Xisaabaha Guud:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 138010 oo ku qoran Maryan Sheekh Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 36.500/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Dh/Mareeb u beddelo Maryan Sheekh Maxamuud Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 314

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353244 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga ahaa 353244 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So, 50.000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahny 202 taariikhdeedu tahay 6.9.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeeg lam. 353244 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=,

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Burco u beddelo Saciid Maxamed Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 315

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353243 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50,000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 202 taariikhdeedu tahay 9,6,82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 353243 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u beddelo Saciid Maxamed Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 316

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353248 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Madar sida ku cad warqadda lam. 202 taariikhdeedu tahay 6.8.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo Amortamento) Jeeg lam. 353248 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u beddelo Saciid Maxamed Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed

L. 317

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUUN ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

HADDUUN ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 353246 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh. So. 5.000/= uu iska lahaa Saciid Maxamed Ma dar sida ku cad warqadda lam. 202 taariikh. 9.6.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco.

HADDUUN ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Amortamento) Jeegga lam. 353246 oo ku qoran Saciid Maxamed Madar ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXUU FARAAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanat Burco u bellelo Saciid Maxamel Madar Jeegga ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka lib markay ka soo wareegto muldo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho. 7.8.82

GUDDOOMIYAHA MGB

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 318